**SHARCI - Lamb. 29 ee 10 Maarso 1973**

**MADAXWEYNAHA**
**GOLAHA SARE EE KACAANKA**

KADIB markii laga baaran degay oggolanshaha Golaha Sare ee Kacaanka.

**WUXUU SOO SAARAYAA:**

Sharciga hoos ku qoran:

## Cutubka 1aad
Qaybta Guud

### Qod. 1
### Dhismaha

Waxaa la dhisay Wakaaladda Qaranka ee Batroolka oo ah Hey'ad Dowli ah oo leh shaqsiyad qeynuuni ah iyo maamul madax banaan.

### Qod. 2
### Xarunta

Wakaaladda saldhigeeda dhexe waa magaalada Muqdisho, waxayna ku yeelan karta saldhigyo kale iyo qeybo goobaha kale ee dalka Jamhuuriyadda Somaliya ama dibedda haddii ay u aragto in ay maslaxad ugu jirto.

### Qod. 3
### Ujeedooyinka

Ujeedada Wakaaladda waxaa ka mid ah:

a) Fulinta cilmi barista la xiriira helista iyo soo saaridda batroolka iyo gaaska dabiiciga ah;
b) Dib uga shaqeynta iyo kala saarista batroolka, gaas dabiici ah iyo waxaa laga soo saaro;
c) Keenista iyo kala qeybinta batroolaka iyo gaaska dabiiciga ah iyo waxa iyaga laga soo saaro;
d) Soo saarista, iibsasha iyo gadista keydinta wixii laga soo saaro, agabyada iyo qalabka isku xira iyo isticmaalka batoorlka iyo gaaska dabiiciga ah;
e) Soo saarista iyo qeybinta waxayaabo la buufiya, wax uruuriyaha iyo wixii u dhigma.

### Qod. 4
### Kormeerka

Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga ayaa iska leh awood kormeerka Wakaaladda.

Xoghayaha Dowladda ee Ganacsigu, wuxuu soo jeedin karaa talooyin markuu u arko in loo baahan yahay ama ay ku jirto danta qaranka wuxuu siin karaa isagoo dhowraayaha xeendaabka sharcigaan, iyo kuwa Wakaaladaha Dowladda ama xeerarka kale.

**Cutubka 2aad**
Qaabdhismeedka

**Qod. 5**
**Xubnaha**

Howlaha Wakaaladda waxaa qaban doono xubnaha oo ka kooban:

a) — Guddiga Maamulka;
b) — Agaasimaha Guud;
c) — Guddiga Howlgelinta;
d) — Guddiga Kormeerka ee Maamulka Maaliyadda;

**Qod. 6**
**Xubnaha Guddiga Maamulka**

Guddiga Xubnaha Maamulka wuxuu ka kooban yahay:

1. — Guddomiyaha Guud ee Wakaaladda;
2. — Wakiil ka socda Wasaaradda Ganacsiga;
3. — Wakiil ka socda Wasaaradda Maaliyadda;
4. — Wakiilka Wasaaradda Macdanta;
5. — Wakiilka Wasaaradda Warshadaha;
6. — 2 sarkaal maamul ee Wakaaladda.

**Qod. 7**
**Magacaabidda xubnaha Guddiga Maamulka**

Xubnaha Guddiga Maamulka waxaa magacaabi doona Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo lala tashtay Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga.

**Qod. 8**
**Howlaha Guddiga Maamulka**

Guddiga Maamulka waa xubinta ugu sareeysa ee go'aaminta iska leh, kaas oo iyadoo la dhowraayo xeendabka awoodooda soo jeedin kara tilmaamaha la xiriira howlaha Wakaaladda.

Shir kasta ee Guddiga Maamulka waa in ay 5 qofood soo xaadiraan si go'aankoodu u noqdo mid ansax ah.

Go'aanadda Guddiga Maamulka waxaa lagu gaari doona tirada hal dheeri ah haddii codeyntu isla eekaadan, codka Guddomiyaha, iyo Agaasimaha Guud ayaa ka dhigi doono go'aanka ugu damebeeyo.

**Qod. 9**
**Magacaabidda Agaasimaha Guud**

Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, kadib soo jeedinta Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga wuxuu magacaabi doonaa Agaasimaha Guud.

**Qod. 10**
**Howlaha Agaasimaha Guud**

Agaasimaha Guud waxaa xubinta ugu sareeyso ee fulinta wuxuuna wakiil ka yahay Wakaaladda. Sidaas awgeed waxaay howlahiisa noqon doonaan:

a) — In uu isugu yeero Guddiga Maamulka soona bandhiga qodobahada laga hadli doono;
b) — In uu hubiyo in la fuliyey go'aanadda Guddiga Maamulka ay gaareen iyo daqliga iyo kharajka;
c) — In isugu yeero uuna haggo shirka Guddiga Kormeerka ee Guddiga Howlgelinta
d) — In uu isugu yeero Guddiga Howlgelinta;
e) — In uu fuliyo howlaha kale ee shuruucda iyo xeeraka nidaamiyaha Wakaaladaha Dowladda ay fursad uu siineyso.

Madaxa Qeybta Wakaaladda ee ugu cimriga dheer ayaa qaban doono howla
ha Agaasimaha Guud haddii uu si ku meel gaar ah ka maqnaado howshiisa ama ay cakiiraad ay ku timaad.

**Qod. 11**
**Marxaladda qeynuuniga iyo dhaqaale ee shaqaalaha Wakaaladda**

Dhaqaalaha Agaasimaha Guud iyo marxaladdisa qeynuuniga ah iyo midka dhaqaale ee shaqaalaha Wakaaladda waxaa lagu maamuli doona Sharciga lamb 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Dekreetada Madaweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamb. 74 ee 22 Abriil 1972 ee la xiriira Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Wakaaladaha Dowliga ah ee lagu soo saaray Dekreeto lamb. 74 44 22 Abriil 1972 iyo wax kast ee wax ka bedelid ah ee ka dambeeysay.

**Qod. 12**
**Guddiga Howlgelinta**

Guddiga Howlgelinta wuxuu ka kooban yahay Agaasimaha Guud, Madaxa Qeybta Shaqaalaha ee Wakaaladda iyo wakiiladaha qeybaha kale sida ku cad Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Wakaaladaha Dowliga ah ee lagu soo saaray Dekreetada lamb 74 ee 22 Abriil 1972 iyo is beddelladii ku yimaaday.

**Qod. 13**
**Howlaha iyo awoodaha Guddiga Howlgelinta**

Guddiga Howlgelinta waxaay mid ah howlahiisa kuwa ku tixan Sharciga lamb. 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Wakaaldaha Dowliga ah.

**Qod. 14**
**Guddiga Kormeerka ee maamulka maaliyadda**

Guddiga Kormeerka ee maamulka maaliyadda wuxuu ka kooban yahay:

a) — Agaasimaha Guud ee Wakaaladda;
b) — Madaxa Qeybta Maamulka ee Wakaalada;
c) — Xubin ka tirsan qeybta maaliyadda.

Xubinta qaabilsan qeybta maaliyadda waxaa ka soo xuli doona Agaasimaha Guud shaqaalaha Wakaaladda.

**Qod. 15**
**Howlaha iyo awoodata Guddiga Kormeerka ee qeybta Maaliyadda**

Howlaha iyo awoodaha loo xilsaaray Guddiga Kormeerka ee qeybta Maaliyaadda ee Wakaaladda waxaa lagu carifay sharciga lamb 58 ee 31 Luulyo 1972, kaas oo qaabilsan maamulka maaliyadda ee Wakaaladaha Dowliga ah iyo wixii laga beddelay.

**Qod. 16**
**Shaqaalaha Wakaaladda**

1. Shaqaalaha Wakaaladda waxay ka kooban yihiin shaqale joogta ah ama ku meel gaarka ah oo Wakaaladdu si toos ah ay u qoratay iyo shaqaale laga soo beddeley qeybaha kale ee dowladda;
2. Qaab dhismeedka shaqaalaha Wakaaladda waxaa lagu tilmaamay dekreeto ka soo baxday Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo lala tashtay ee Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga;
3. Shaqalaha wakaaladda waxaa lagu qori doonaa Dekreetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamb. 74 ee 22 Abriil 1972 ee la xiriira Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha ee Wakaaladaha Dowliga iyo wixii laga beddelay.

**Qod. 17**
**Waajibaadka iyo mas’uuliyadda**

1. Marxaladda qeynuuniga ah, waajibaadka iyo mas’uuliyadda Shaqaalaha Dowladda oo loo soo wareejiyey Wakaaldda waxaa lagu maamuli doona Sharciga lamb. 29 ee 1 Abriil 1970 iyo isbeddeladdi la xiriira Xeer Nidaamiyaha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;
2. Marxalaadda qeynuuniga ah, wajiibdka iyo mas’uuliadda shaqaalah.Wakaaladda waxaa lagu maamuli doona Sharciga lamb. 36 ee 22 Abriil 1972 iyo Xeer Nidaamiyaha Shaqalaha ee Wakaaladaha Dowliga ah oo ku xusan Dekreetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lamb. 74 ee 22 Abril 1972 iyo wixii dib loogaga beddeley.

**Qod. 18**
**Shaqo ka qaadis**

Agaasimaha Guud, Agaasimayaasha Qeybaha waxaa loogaga qaadi kara jagadooda iyadoo la isticmaalaya isla qaabka horay loogu magacaabay.

**Cutubka 3aad**
Amarrada Guud

**Qod. 19**
**Hantida Wakaaladda**

Hantida Wakaaladda waxay ka kooban tahay:

a) — Hantida guurtada iyo maguurtada ah, hantida iyo xuquuqda ay leheed Shirkada AGIP (Somalia) S.P.A oo saldhigeedu ah Muqdisho oo lagu qarameeyey sharciga lamb. 26 ee 7 Maay 1970;
b) — Daqliga ka soo gala howlaheeda;

c) — Deeq kasta ee kaga timaada Dowladda, Hey’adaha Dowliga ah ama kuwa gaarka loo leeyahay iyo shirkadaha caalamiga ah;
d) — Keydka haraaga ah ee ka soo gala saamiyada loo isticmaalay xeendaab sharciga ee Wakaaladah Dowliga iyo wixii beddelad ay ee ka dambeyey;
e) — Wixii daqli ah ee mar mar soo gala.

**Qod. 20**
**Misaaniyadda sanadlaha ah**

Sanad kasto misaaniyadeedu waxay bilaaban doonta 1da Janaayo waxayna ku eg tahay 31 Diseembar ee isla sanadkaasi.

**Qod. 21**
**Misaaniyadda hor dhac ah**

Bisha Oktoober gudaheed, ee sanad kasto, Agaasimaha Guud wuxuu diyaarin doonaa misaaniyad hor dhac , isagoo tilmaami doono daqliga iyo kharajka la xiriira sanadkii la soo dhaafay iyo howlaha ay Wakaaladda ee sanadkaasi.

Misaainyadda hor dhaca ah ee siday loo qoro waxaa lo geeyn doona si loo aqbalo Guddiga Maamulka muddada 30 Nofeember, iyadoo la horgeyn doono Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga si loo helo oggolanasho ugu dambeyey.

**Qod. 22**
**Misaaniyadda la isticmaalay**

Sanad maaliyeed kasto markuu dhamaado iyadoo aan laga gadaal marin 30 Maarso ee sanadkasto, Agaasimaha Guud wuxuu diyaarin doona misaaniyad sanadkii la soo dhaafay iyado la tilmaamayo faa’idooyinka iyo qasaaraha iyo tirakoobka guud ee hantida Wakaaladda.

Misaaniyaada sanadkii la soo dhaafay waxaa la horgeyn doona si loo aqbalo Guddiga Maamuka waxaa haddana loo bandhigi doonaa ilaa 31 Maarso Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga si loo aqbalo kadib markii lala tashtay Xoghayaha Dowladda ee Maaliyadda.

**Qod. 23**
**Xisaabinta**

Xisaabinta Wakaaladda waxaa lagu maamuli doona iyadoo la raaci doono qabaabka lagu tilmaamay amarrada guud ee Sharciga lamb 58 ee 31 Luulyo 1972 ee la xiriira Maamulka Lacanta ee Wakaaladda Dowliga iyo kuwii lagu beddelay.

**Qod. 24**
**Amaahda**

Wakaaladdu kadib markii ay hesho oggolaanshaha Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga waxay la geli kartaa heshiis amaah ee Hey’adaha Amaahda iyo bangigayada gudaha ama dalka dibediisa.

**Qod. 25**
**Xisaab celinta**

Xisaab celinta ee Wakaaladda waxaa kormeeri doona ama dib-u-eegidda waxaa iska leh Qeybta ka tirsan Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

Xoghayaha Dowladda ee Warshadaha wuxuu amri karaa waqti kasta baaris iyo kormeer xisaabaadka iyo maamuleed iyadoo la tixgelinayo amarradda faqradda sare ku xusan.

**Qod. 26**
**Xeerka**

Xeerarka fulinta ee sharcigaan waxaa lagu soo saari doona Dekreetada Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka iyadoo la socoto soojeedinta Xoghayaha Dowladda ee Ganacsiga.

**Qod. 27**
**Burin**

Waxaa la buriyeye xeer kasta oo ka hor imaaneysa ama khilaafsan sharcigaan.

**Qod. 28**
**Hirgelinta sharcigaan**

Sharcigaani wuxuu hirgeli doonaa laga bilaabo1da Janaayo 1972.
Sharcigaan waxaa lagu soo dabaaci doona Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Democratiqa ah ee Somaliya.

Muqdisho, 10 Maarso 1973.

Madaxweynaha
Golaha Sare ee Kacaanka
**Sareeye Guuto Mohamd Siyaad Barre**